# Codsiga Caymiska Dadka iskood u Shaqaynta

Fasaxa Mushaarka lagu qaato ee Oregon

Dadka iskood u shaqaysta ayaa dooran kara inay ka qaybgalaan Paid Leave Oregon.

Xulashada caymis lagu baxsho barnaamijka Paid Leave Oregon waa dedaal qaadanaaya sadex sano. Waxaa lagaa doonayaa inaad ku bixiso qoondooin afar jeer sanadkii barnaamijka ayadoo lagu salaynaayo dakhligaaga xaasilka ah ee canshuurtaadii sanadkii hore ee kaasoo galay shaqadaada gaarka ah (dakhliga guud oo laga jaray qarashaadka) kadib marka la aqbalo codsigaaga.

Waxaan ku talinaynaa inaad isbarto qeexitaanka qof iskiis u shaqaysata sida lagu qeexay xeerka ORS 657B.010 (22), dhammaan erayada barnaamijka, shuruudaha, iyo waajibaadka kahor intaadan soo dirin codsiga. Waxaad xog ka heli kartaa barta paidleave.oregon.gov ama naga codsan kartaa xogta adoo nagasoo wacaaya 503-947-1488.

**Hordhacyada:**

- **Godadka lagu calaamadeeyay * waa qasab in la buuxsho**
- Fadlan xaqiiji in jawaabuhu sax yihiin
- Waxaan ogeysiis kuugusoo diri doonaa boostada kadib marka aan helno codsigaaga
- Ku buuxi foomkaan khad madoow ama buluug ah
- Boostada ugu dir foomka aad buuxisay iyo dukumiintiyada lagaa rabo ciwaanka ku qoran bogga 3

## AQOONSIGA

| | |
|---|---|
| *Magaca Koobaad: | *Magaca Ugu danbeeya: |
| Nooca Ganacsiga aad samayso (DBA): | |
| *Taariikhda Dhalashada (bisha/maalinta/sanadka): | ☐ Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga (SSN) ama<br>☐ Lambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Gaarka ah (ITIN)<br>*Lambarka: _____ – ____ – _______ |
| Ruqsada Darawalnimada/Lambarka Aqoonsiga Gobalka:<br>Taariikhda lasoo saaray Ruqsada Darawalnimada ee Gobalka: | |

## XOGTA XARIIRKA

| | |
|---|---|
| Wadanka taleefanka: | Nooca Taleefanka (mid goobin geli): Guriga \| Gacanta \| Shaqada \| Nooc kale: |
| *Lambarka taleefanka: | Ciwaanka Iimaylkaa: |

## CIWAANKA GOOBTA

| | | | |
|---|---|---|---|
| *Lambarka wadada 1: | | | |
| Lambarka wadada 2: | | | |
| Nooca guriga: | Lambarka qaybta Guriga: | *Magaalada: | |
| *Gobalka: | *Koodhka Aaga: | Degmada: | Fiiro gaar ah: |

## CIWAANKA BOOSTADA *(haddii uu ka duwan yahay kan guriga)*

| | | | |
|---|---|---|---|
| *Lambarka wadada 1: | | | |
| Lambarka wadada 2: | | | |
| Nooca guriga: | Lambarka qaybta Guriga: | *Magaalada: | |
| *Gobalka: | *Koodhka Aaga: | Degmada: | Fiiro gaar ah: |

## XOGTA DEEGAANKA GANACSIGA

Waa maxay shaqada aasaasiga ah ee ganacsigaaga*?

Koodhka Nidaamka Astaynta Ganacsiga ee Maraykanka (MAICS), haddii aad taqaano:

## CADAYNTA DAKHLIGA

Waa inaad buuxisaa cadaynta dakhligaaga sanadlaha ah aadna keentaa dukumiintiyada canshuur celintaada dakhliga gaarka ah ee Oregon iyo kuwa federaalka ugu danbayn Abriil 30 sanad kasta si loo ogaado dakhliga xaasilka ah ee aad ka heshay ganacsigaaga sanad canshuureedkii hore. Xogtaan ayaa loo adeegsan doonaa go'aaminta qoondooyinka lagaa rabo inaad ku bixiso barnaamijka Paid Leave Oregon iyo cadadka dheefaha aad helayso mustaqbalka.

Haddii aadan gudbin canshuur celintaada canshuurta dakhliga ee Oregon ee sanad canshuureedkii hore, soo dir canshuur celintii ugu danbeysay ee aad samaysay. Marka aad u dirto canshuur celinta sanadihii hore Waaxda Canshuuraha ee Oregon (DOR), fadlan dir nuqulka canshuur celinta barnaamijka Paid Leave Oregon ugu danbayn Oktoobar 30.

Masoo dirtay canshuur celin wadaag ah? ❑ Haa ❑ Maya

Haddii ay haa tahay, ma waxaad tahay qof dakhliga ka hela keliya ganacsigiisa? ❑ Haa ❑ Maya

Waxaa lagaa doonayaa inaad lifaaqa soo geliso **Canshuur celintaada Dakhliga gaarka ah ee Federaalka (Foomka 1040) iyo Foomkaaga Oregon ee OR-40, ama Foomka Oregon ee OR-40-P.** Waa qasab inaad dhammaan dukumiintiyadaan ku dartaa jadwaladaada.

Haddii la ogolaado, Waaxda Shaqada ayaa ka xaqiijin doonta Waaxda Canshuuraha ee Oregon (DOR) dakhliga xaasilka ah ee Oregon ee lagu sheegay dukumiintiga. Haddii aadan ogolaansho u siin Waaxda Shaqada inay dakhliga xaasilka ah ee aad ka heshay ganacsigaaga ka xaqiijiso DOR, waa inaad keentaa cadaynta rasmiga ah ee canshuur celinta oo kasoo baxday DOR.

Waxaan u fasaxayaa Waaxda Canshuuraha ee Oregon inay u sheegto magacayga, ciwaanka, Lambarka Social Security (SSN) ama Lambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Gaarka ah (ITIN), iyo dakhliga xaasilka ah ee Oregon ee ganacsigayga ee sanad canshuureedka lagu sheegay codsigaan si ay u xaqiijiso xogta sida loo sheegay ama wax looga badelay canshuur celintayda dakhliga gaarka ah ee Oregon si la ii siiyo gunnooyinka Barnaamijka Paid Leave Oregon. Waxaan ogolaanayaa in xogtayda loo sheego shaqaalaha Waaxda Shaqada ee saxiixay heshiiska sirta ee Waaxda Canshuuraha. ❑ Haa ❑ Maya

***Waa maxay dakhligaaga xaasilka ah ee aad ka heshay ganacsigaaga sida aad ku sheegtay canshuur celintaada dakhliga gaarka ah ee Oregon?***

***$ _____________***

***Fadlan eeg bogga 3 si aad u hesho foomamka kaladuwan ee canshuurta ee aad adeegsan karto si aad u raadiso dakhligaaga xaasilka ah.***

## XAQIIJINTA

☐ Waxaan qirayaa anoo og inaan ganaaxi mari karo hadaan been sheego in xogta aan kor ku baxshay ay tahay run ayna sax tahay ilaa heerka aan ogahay aana aaminsan nahay. Waxaan fahmayaa in sharcigu uu ciqaabaayo haddii aan sheego hadallo been ah si aan dheefo uga helo barnaamijka Paid Leave Oregon.

☐ Waxaan aqbalayaa dhammaan waxyaabaha soo socdda: 1) inaan baxsho qoondooyinka muddo aan ka yarayn sadex sano (ORS 657B.130); 2) inaan baxsho xog kasta iyo dukumiintiyada dakhligayga xaasilka ah ee aan ka helo ganacsigayga ay waaxdu u aragto mid muhiim u ah bixinta caymiska aan doortay, ayna ku jirto laakiin aan ku koobnayn, inaan keeno nuqulka canshuur celinta dakhligayga gaarka ah ee Oregon (OAR 471-070-2010); iyo 3) inaan keeno xog dheeri ah si loo xaqiijiyo u qalmida caymiska aan doortay, haddii waaxdu iga codsato.

☐ Waan fahmayaa in aanan joojin karin caymiska aan doortay ee gaarka ah ee ganacsigayga ilaa caymisku uu ka dhaqan galaayo ugu yaraan muddo sadex sano ah, ilaa inaan soo gudbiyo maahee cadaynta dalaafida ganacsiga, aan badelo nooca shaqada, ama aanan helin ugu yaraan $1,000 oo dakhli xaasil ah oo igasoo gala ganacsiga snad canshuureedka xiga, iyo si aan u codsado joojinta caymiska, inay qasab tahay inaan soo diro codsiga joojinta aan keeno dukumiintiyada uu aqbalaayo barnaamijka Paid Leave Oregon. (ORS 657B.130; OAR 471-070-2170)

☐ Waan fahmayaa in waaxdu ay joojin karto caymiska aan doortay ee gaarka ah ee ganacsigayga mid kasta oo kamid ah sababaha soo socda awgood: 1) marka aan ka dib dhaco bixinta qoondooyinkayga, 2) marka aan keeno waayo foomka xaqiijinta dakhliga sanadlaha ah, 3) haddii aanan u qalmin barnaamijka, ama 4) sabab kasta oo ii diidaysa inaan u qalmo caymiska ay jirto aanana awoodi doonin inaan doorto caymiska muddo sadex sano ah. (OAR 471-070-2170)

☐ **Waxaan shaacinayaa anoo og ganaaxa aan sharciga ku mutaysan karo in xogta kore ay sax tahay ayna run tahay.**

Waxaa la dhaqan gashay _______Maalinta ____________, ______________ goobta ___________________, ____________.

bisha sanadka magaallada gobalka

| Saxiixa: | Taariikhda: |
| --- | --- |

| Fadlan kusoo celi foomkaan iyo dukumiintiyada lagaa rabo: | **Oregon Employment Department**<br>**Paid Leave Oregon Self-Employed Application**<br>**875 Union St NE**<br>**Salem, OR 97311** |
|---|---|

## CAAWIMAAD MA U BAAHAN TAHAY?

Waaxda Shaqaalaynta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu isticmaalo barnaamijyada iyo adeegyada OED. OED waxay bixisaa caawimo bilaash ah. Tusaalooyinka qaarkood waa luqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luuqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, Farta Indhoolaha, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Haddii aad u baahan tahay caawimo, fadlan wac 833-854-0166. Isticmaalayaasha TTY waca 711. Waxaad sidoo kale caawimaad ka weydiisan paidleave@oregon.gov.

## OGOOW DAKHLIGAAGA XAASILKA AH

Adeegso xogta soo socota si aad u hesho dakhligaaga xaasilka ah ee ganacsiga ama qandaraaska madaxa banaan.

**Dadka dagan Oregon (Foomka OR-40)**

| Nooca qaab dhismeedka ganacsiga | "Dakhliga Xaasilka ah" | Foomka canshuurta | Laynka foomka canshuurta |
|---|---|---|---|
| Ganacsi Hal Qof Leeyahay | • Faa'iidada xaasilka ah (khasaarada) | Jadwalka C (Foomka 1040) | Laynka 13 |
| Beerta | • Faa'iidada xaasilka ah ee beerta ama (khasaarada) | Jadwalka F (Foomka 1040) | Laynka 34 |
| Iskaashi | • Lacagaha damaanada leh, iyo<br>• Dakhliga caadiga ah ee ganacsiga (khasaarada) | Canshuur gudbiye hal qof ah - Jadwalka E (Foomka 1040) | Laymanka 28i iyo 28k |
| | | Canshuur gudbin dhawr qof ah - Jadwalka K-1 (Foomka 1065) | Laymanka 1 iyo 4a |
| Shirkadaha Ganacsiga wayn (S Corporation) | • Dakhliga caadiga ah ee ganacsiga (khasaarada) | Canshuur gudbiye hal qof ah - Jadwalka E (Foomka 1040) | Laymanka 28i iyo 28k |
| | | Canshuur gudbin dhawr qof ah - Jadwalka K-1 (Foomka 1120-S) | Laynka 1 |

**Dadka dagan Oregon (Foomka OR-40-P)**

| Nooca qaab dhismeedka ganacsiga | "Dakhliga Xaasilka ah" | Foomka canshuurta | Laynka foomka canshuurta |
|---|---|---|---|
| Ganacsi Hal Qof Leeyahay | • Faa'iidada xaasilka ah (khasaarada) | Foomka OR-40-P | Laynka 13S |
| Beerta | • Faa'iidada xaasilka ah ee beerta ama (khasaarada) | Foomka OR-40-P | Laynka 18S |
| Iskaashi | • Lacagaha damaanada leh, iyo<br>• Dakhliga caadiga ah ee ganacsiga (khasaarada) | Fiiri foomkaaga Oregon K-1 | Laynka 1b iyo 4 |
| Shirkadaha Ganacsiga wayn (S Corporation) | • Dakhliga caadiga ah ee ganacsiga (khasaarada) | Fiiri foomkaaga Oregon K-1 | Laynka 1b |

## SHAACINTA IKHTIYAARIGA AH

Bixinta xogtaan waa ikhtiyaari. Waxaan aruurin doonaa jawaabtaada si aan warbixin u gudbino keliya jawaabaha aad bixisana saamayn kuma lahan u qalmidaada caymiska barnaamijka Paid Leave Oregon.

Ma qabtaa naafo? Waxaa laguu tixgelin doonaa inaad naafo tahay haddii aad qabto naafada jirka, garaadka, iyo/ama kobaca ama xaalad caafimaad oo si wayn u xadidaysa shaqo wayn, ama haddii aad soo martay ama diiwaanka kuugu qoran yahay naafo ama xanuun.

- ☐ Haa
- ☐ Maya
- ☐ Madoonaayo inaan kajawaabo
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)

Waa maxay aqoonsigaaga halgamaaga ama ciidanka?

- ☐ Waxaan ahay qof hawlgab ka noqday Ciidanka qalabka sida ee Maraykanka, Kaydka Milatariga, ama Ilaallada Qaranka
- ☐ Waxaan hadda ka shaqeeyaa Ciidanka qalabka sida ee Maraykanka, Kaydka Milatariga, ama Ilaallada Qaranka
- ☐ Ma ihi qof ciidanka hawlgab ka noqday ama ma lihi wax aqoonsiga ciidanka ah
- ☐ Madoonaayo inaan kajawaabo
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)

Shakhsi ahaan noo sheeg qofka aad tahay? Fadlan dooro dhammaan kuwa khuseeya.

- ☐ Hindi Ameerikaan, Ameerikaanka Dhaladka ah ama Asalka Alaska
- ☐ Eeshiyaan
- ☐ Madoow ama Afrikaan Ameerikaan
- ☐ Hispanic/Latino/a/x
- ☐ Carabta bariga Dhexe ama Waqooyiga Afrika
- ☐ Hawaii Dhalad ah, U dhashaha Jasiirada Pacific
- ☐ Cadaan
- ☐ Lama Sheegin ________________
- ☐ Waxaan doorbidayaa inaan is qeexo ________________
- ☐ Madoonaayo inaan kajawaabo
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)

Waa maxay luuqada rasmiga ah ee gurigaaga looga Hadlo?

- ☐ Ingiriiska
- ☐ Isbaanish
- ☐ Fiitnaamiis
- ☐ Ruush
- ☐ Mandarin
- ☐ Cantonese
- ☐ Carabi
- ☐ Soomaali
- ☐ Lao
- ☐ Amxaari
- ☐ Faarsi
- ☐ Lama Sheegin ________________
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)

Waa maxay shahaadada ama heerka ugu sareeya ee aad dugsiga ka gaartay?

- ☐ Dugsi ma dhigan
- ☐ Wax ka yar dugsiyada Sare
- ☐ Shahaadada dugsiga sare oon buuxin, ma qaadan shahaado
- ☐ Ka baxay dugsi sare, ayna ku jirto GED ama wax u dhigma
- ☐ Dugsi farsamo, ganacsi ama tababar shaqo
- ☐ Waxbarashada jaamacada heerka koobaad ama dibloomada
- ☐ Shahaadada koobaad ee jaamacada
- ☐ Heerka labaad/sadexaad ee jaamacada
- ☐ Madoonaayo inaan kajawaabo
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)

Ma tahay Hispanic, Latino/a/x ama qof kasoo jeeda Isbaanish? Fadlan dooro hal jawaab.

- ☐ Haa, waxaan ahay Hispanic, Latino/a/x ama qof kasoo jeeda Isbaanish
- ☐ Maya, ma ihi Hispanic, Latino/a/x ama qof kasoo jeeda Isbaanish
- ☐ Ma garanayo
- ☐ Madoonaayo inaan sheego
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)

Haddii aad uga jawaabto haa dooro mid kamid ah kuwa soo socda:

- ☐ Bartamaha Ameerika
- ☐ Dominican
- ☐ Puerto Rican
- ☐ Mexican
- ☐ Koonfurta/Bartamaha Ameerika
- ☐ Spain
- ☐ Madoonaayo inaan kajawaabo
- ☐ Waxaan doorbidayaa inaan is qeexo
- ☐ Ma hubo (wakiilka ogolaanshaha haysta)